Warbixintaguudeetallaalka Covid-19 iyotallaalka mRNA

(Pfizer/BioNTech, Moderna)

Tallaalka badqab iyo waxtar ma yahay?
Tallaal walba ee Switzerland wuxuu u baahanyahay ansixinta lagu isticmaalayo iyo tallada. Ujeedadaan darteed, waa inay buuxisaa sharuudaha sareeyo ee badqabka, waxtarka iyo tayada. Wakaalada Swiss ee Badeecooyinka Daaweynta Swissmedic waa la wada baaray oo loo ansixiyay mRNA tallaalada la dagaalamo Covid-19. Waa badqab iyo waxtar.
Dhoor tobaneeyo kun oo dad ah ayaa ku qaatay tallaalka tijaabooyinka. Tan iyo ansixintooda, dhoor balaayiin dad ah ayaa lagu tallaalay tallaaladaan.Sidoo kale badqab iyo waxtar ayay u tahay dadka da'da waayeelka iyo dadka qabo cudurada raaga.
Taqasusyada ayaa sii wado inay kormeeraan badqabka iyo waxtarka tallaalada. Faa'idooyinka tallaalka waa inuu si cad u cabiraa halisaha. Kaliya markaas kadib ayaa tallaalkaan loogu talliyay Switzerland
Guud ahaan kuwa xiggo ayaa muhiim ah: Halista saameynada caafimaadka tallaalka kadib aad ayuu uga yaryahay halista inaad si daran ula xanuunsatid caabuqa kadib ee fayraska korona.

Halkee ayaan qaadan karaa tallaalka?
Dowlada faderaalka waxay hormarisay xeelada tallaalka iyo tallooyinka tallaalka. Ka fiiri websaydka ama leenka warbixinta degmadaada (www.bag-coronavirus.ch/kantone) si aad u ogaatid meesha aad ka heli kartid tallaalid. Ama weydii dhaqtarkaaga, farmashiistahaaga ama farmashigaaga.

Cida tallaalka loogu talliyay?
Waxaan ugu talineynaa tallaalka Covid 19 oo tallaalka mRNA dadka oo dhan oo da'da 12 sanno jirka iyo ka weyn.
Talladaan waxay si gaar ah u quseysaa

- Dadka sida gaarka ah halis ugu jiro fayraska koronaha (Dadka qabo cudurada raago qaar, dadka 65 sanno jirka iyo ka weyn, iyo dumarka uurka ah);
- xiriiradooda dhow ee jawiga gaarka iyo xirfadlaha.

Carruurta da'da 5 illaa 11 sanno jirka ah, waxaan ku talineynaa tallaalida oo tallaalka carruurnimada Pfizer/BioNTech.

Yaa ah inuusan tallaal qaadan oo tallaalada mRNA?
Kulama talineyno tallaalka Covid 19 ee tallaalka mRNA inay qaataan shaqsiyaad xiggo:

- Shaqsiyaadka qabo alaarjiga daran ee laga xaqiijiyay qeyb walba ee tallaalada, gaar ahaan polyethylene glycol (PEG)ama tromethamine (TRIS). Waxaa jiro noocyo kale oo tallaalo ah sidoo kale. Fadlan kala tasho dhaqtarka alaarjiga wixii tallo ah.
- Carruurta iyo qaangaarka ka hooseeyo 5 sanno jirka. Illaa iyo hadda, ma jiraan xog ku fillan tallaalka heerkaan.

Fadlan ogow: Ma qabtaa qandho sareyso? Miyaad jirantahay iyo ma dareemeysaa xanuun? Haddii ay sidaas tahay, dib u dhig balantaada tallaalka. Qaado tallaalka sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah.

Waxa quseeyo haddii aan uur ahay ama aan rabo inaan uur noqdo?
Miyaad qorsheyneysaa inaad uur qaadid? Markaas isu tallaal sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah. Ma horaan ayaad uur u laheyd oo aadan qaadan tallaalka ka hor inta aadan uur qaadin? Kadib waxaan ku talineynaa tallaal laga bilaabo 12 isbuuc uurka ah (oo macnaheedu yahay laga bilaabo bisha saddexaad ee uurka). Si kastaba, waxaa sidoo kale suurtogal ah horaantii uurka.

Haddii aad uur tahay ama aad qorsheyneysid inaad uur qaadid oo aad qabtid su'aalo ku saabsan tallaalka, la hadal bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka ama umulisada.

Sidee ayaa tallaalida loo sameeyay?
Waxaad ka qaadaneysaa saliinka garabka kore. Tallaalka koowaad kadib, waxaad joogeysaa goobta 15 daqiiqo kormeer ah.

Intee jeer ayaan u baahannahay inaan ku qaato tallaalka?
Waxay caadi u baahantahay labo tallaal oo tallaalka aasaaska ah.Waxaad qaadan kartaa tallaalka labaad afar isbuuc mida koowaad kadib.

Qaado labada tallaalo.
Haddii aad horaan u qabtay caabuqa fayraska korona ee la xaqiijiyay (baaritaanka PCR, baaritaanka degdega antijeenka, baaritaanka difaaca jirka), waxaad caadi ahaan kaliya u baahantahay hal tallaal oo tallaalka mRNAbidin wixii tallaalka aasaaska.

Ka dhaafidaha ayaa quseeyo dadka sida gaarka ah u nugul oo leh difaaca jirka liito; la hubi dhaqtarkaaga.

Dadka da'dooda ah 12 sanno jirka iyo ka weyn, tallaalka xoojiyaha waa lagu talliyay laga bilaabo 4 bilood kadib aasaaska tallaalida dhameystiran kadib. (fiiri warqada ugu yar «*Tallaalka xoojiyaha tallaalka mRNA*»).

Sidee ayuu tallaalka ii illaaliyaa?
Jirkaaga ayaa dhiso illaalo looga soo horjeedo Covid-19.
Tani waxay raagtaa illaa qiyaastii hal ama labo isbuucyo tallaalka labaad kadib.Tallaalka wuxuu xoojiyaa difaacaaga jirka. Wuxuu ku caawiyaa jirkaaga inuu la dagaalamo fayraska. Halista ah inuu kugu dhaco covid-19 daran ayaa aad u yaraato.
Tan waa muhiim in la ogaado: Kala duwanaanshaha fayraska hadda jira, tallaalka aad kuuma illaaliyo oo kaliya wuxuu kaa illaaliyaa caabuqa iyo jirada fudud. Wuu kugu dhici karaa Covid-19 iyada oo aan laga eegin tallaalka.

Halkaan waxaad ka heli kartaa warbixin badan oo sharaxan ee ku saabsan sida tallaalka u shaqeeyo
www.bag-coronavirus.ch/mrna

Illaa intee ayuu tallaalka ii illaaliyaa?
Tallaalka mRNA waxay si fiican u illaalisaa cudurada daran eel eh isbitaal seexinta. Si kastaba, illaaladaan tallaalka aasaasiga ah waxay si degdeg ah u yareysaa kala duwanaanshaha fayraska hadda jira. Waxaan ku talineynaa in dhammaan dadka 12 sanno jirka ah iyo ka weyn ay qaataan tallaalka xoojiyaha oo bilaabanayo 4 bilood kadib tallaalka aasaaska markii la dhameystiro. Tallaalka xoojiyaha wuxuu kordhiyaa oo dheereeyaa illaalada ku aadan cudurada. (fiiri warqada "*warqada tallaalka xoojiyaha*").

Miyaan qaadi karaa Covid-19 sababtoo ah tallaalka?
Maya. kugu ma ridayo covid-19 tallaalka.
Ma jiraan fayraska korona ee ku jiro tallaalada.

Miyaan heli karaa tallaal haddii aan horaan u qaaday fayraska korona?
Is tallaalida ayaa sidoo kale ah muhiimad aad u wanaagsan haddii aad horaan u qabtay caabuqa fayraska korona. Waxaan sidaas darteed ku talineynaa tallaalida si markaas aad si wanaagsan uga illaalsantahay iyo waqti muddo dheer. Laga bilaabo afar isbuuc kadib caabuqa fayraska koronaha la xaqiijiyay, hal garoojo tallaal ah ayaa caadi ahaan ku fillan aasaaska tallaalka.

Miyay jiraan wax saameynada caafimaadka ah?
Tan iyo ansixinta, dhoor bilyan oo dad ayaa lagu tallaalay tallaaladaan, iyo faa'idooyinka ayaa si cad ugu culus halisaha. Waxaa jiri karo saameynada caafimaadka oo tallaal walba ah. Inta badan waa fudeed illaa dhexaad oo dhaqso ayay baaba'aan. Aad dhif u ah, waxaa jiro saameynada caafimaadka oo daran. Tusaale ahaan, shaqsiyaadka la kulmo falcelinta alaarjiga daran oo si toos ah tallaalka Covid-19 kadib oo leh tallaalka mRNA. Dacwadaha aadka dhifka u ah, bararka muruqa wadnaha ama daboolka wadnaha waxaa lagu arkay 14 maalmood tallaalida kadib, taas oo caadi ahaan fudud oo si wanaagsan ayaa loo daaweyn karaa. Dadka ka hooseeyo 30 sanno jirka, sida bararka waxaa loo kormeeray si aad joogta u ah ku tallaalida tallaalka Moderna kadib. Sidaas darteed, ku tallaalida tallaalka Pfizer/BioNTech waxaa loogu talliyay si la doorbiday dadka ka hooseeyo 30 sanno jirka. Kuwa xiggo waxay quseysaa labada tallaalba: Faa'idooyinka tallaalka Covid 19 waxay cabirtaa halisaha suurtogalka ah, xittaa dadka da'yarta ah. Bararka muruqa wadnaha ama daboolka wadnaha ayaa sidoo kale dhaco caabuqa cayraska korona kadib.

Waa maxay saameynada caafimaadka suurtogalka ah?
- Aaga garabkaaga meesha lagaa tallaalay ayaa gaduudato, xanuun ah, ama bararta.
- Madax xanuun
- Daalka
- Xanuunka muruqa iyo xubinta
- Aastaamaha guud sida qarqaryada, dareemida qandho ama lahaanshaha qandho yar

Saameynadaan caafimaadka inta badan waxay dhacaan tallaalka kadib. Waxay muujiyaan in jirka uu dhisayo illaalo lagula dagaalamo cudurka.
Xaalada falcelinta alaarjiga, waxaa jiro, tusaale ahaan, barar daran, gaduudasho, cuncunm ama yaraanshaha neefsashada islamarkiiba tallaalka kadib. Caadi ahaan aastaamaha muruqa wadnaha waa xabad xanuun, neefsashada oo yaraata iyo wadno joogsiga, inta badan dacwadaha 2 isbuuc gudahood tallaalka kadib. La xiriir dhaqtarkaaga islamarkaasba haddii aad la kulantid aastaamo noocaas ah.

Illaa intee ayay saameynada caafimaadka raagi karaan?
Saameynada caafimaadka ayaa caadi ahaan dhammaado dhoor maalmood kadib. Weli ma qabtaa saameynada cdaafimaadka isbuuc kadib? Miyay ka sii darayaan? Ama miyaad walaacsantahay? Markaas la hadal dhaqtarkaaga ama xirfadlaha daryeelka caafimaad.

Yaa bixiyo lacagta tallaalka?
Tallaalka bilaash ayuu kugu yahay. Shirkada caymiska caafimaadka ayaa bixiso qeyb ka mid ah tallaalka. Dowlada faderaalka iyo gobolada ayaa bixiyo inta kale.

Tallaalka ma iqtiyaarbaa?
Haa. Tallaalada gudaha Switzerland waa iqtiyaar.

Halkee ayaan ka heli kraa warbixin badan?
Wixii warbixin dheeraad ah ee tallaalka Covid 19 waxaad booqan kartaa websaydka BAG:
www.bag-coronavirus.ch/impfung
Ama weydii dhaqtarkaaga. Ama farmashiyahaaga.

Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

Swiss Confederation

Bundesamt für Gesundheit BAG
Office fédéral de la santé publique OFSP
Ufficio federale della sanità pubblica UFSP
Uffizi federal da sanadad publica UFSP

www.foph-coronavirus.ch/vaccination